

Qalab Nadaafadeed oo aamina ah oo loogu talo galay Dadka Asmada lef ama

Neefta Qaab fudud oo loo isticmaali karo qalabka wax lagu nadiifiyo oo aan rixaanrixyo, cuncun, xanto xanto ama dhibayn dhuunta hawo qaadashada!

Waxa Nadiifiya Musqusha, Suuliga ama baytalmayga

- Beekin soda
 - Saabuunta loo yaqaano Liquid castila *
- Ku dul shub beekin sodaha midiiabad dhexdii. Ku biiri dhawr dhibcood oo saabuun ah. Xoq oo ku dhamaystir dusheed adigoo ku dhalaalaya beekin soodaha.

Nadiifinta Qasabadda iyo Sinxiga

- Beekin sooda
 - Saabuunta loo yaqaano Liquid castila *
- U isticmaal beekin soodaha meesha aadubto in aad nadiifiso. Ku du caddie weelka kuna duug ama xoq maro qoyan. Wax yar oo saabuuna ku shub marada si uu si aad u fiican u nadiifoobo. Ka dibna si fiican u biyo raaci.

Nadiifinta Meelaha Gododka ah

- Beekin soda
- Khal
- Biyo aad u kulul ama isku labo ro-gaya

Habkani wuxuu furi ama nadiifin karaa meelo yaryar. Ku shub ½ koob beekin soodaha ah gudaha meesha qu-faysan ama xidhan, kadibna ½ haaf khal ah. Dhaaf dhaw daqiiqadood ha isla soo kacaane ama soo xubboobaane. Kadibna ku shub kildhiga biyihii kululaa ama karayay kudaha dalooka ama godka.

Nadiifinta wax kasta

- 1 2/3- koob oo beekin soda ah
- ½ -koob oo isaabuunta loo yaqaanko kaastile (castile soap) *
- ½ -oo koob oo biyo ah
- 2 qaaddo, malqaacad ama mal-caaqad
- 16- quraaradood ama dhalo korka ka soo laaban

Hal weel Isku qas oo isku dar beekin soodaha iyo saabuunta. Ku dar biyo, kadibna ku dar khalka. Ku shub dhalada ama quraaradda dhuuban. Hadii ay aad u adagtahay, ku dar biyo. Si fiican u rux. Ku dhuuji ama tuuji tuumbada, sinxiga, musqusha ama suuliga iyo wixii la mid ah. Duug ama xoq oo biyo raaci.

In la nadiifiyo wixii aan sunlahayn waa arin suuban oo aad ku nadiifin lahayd aqalkaaga asmada ama neefta u maareeyn lahay in aanay sii kordhin. Qaababkani way fududyihiin, wayna qiimo yaryihiin hawadana dhibaato ma gaadhsiinayaan. Kuwanna waa qaab kale oo aad wax u nadiifin karto si aad uga fogaato wax kasta oo sababi kara asmada ama xanuunka neefta

Goorta uu KA MAQANYA-HAY gofka asmada ama neefta lihi agalka nadiifi had-dii ay kuu suurto gasho!

*Haddii aad waydo saabuunta Kaastila (castile soap), waxa aad isticmaashaa Saabuunta Muufiis (Murphy's soap). **Dhamaan tusmadani waxay ka helnay**

Hay'adda Sambabka ee la xidhiidha xubnaha jidhaka "Soo bandhiggidda Nadiifinta dabiiciga ah"

Nadiifinta Ofenta qaybta hoose ee shooladda

- Beekin soda
- Biyo
- Burush ama wax wax lagu xalo

Ha u isticmaalin habkan qaabka shooladaha ofanteed iskood isku nadiifiyaan.

Isku dhex dar 1-koob oo beekin soodaha ah iyo biyo si aad sal uga dhigtid. Ku nadiifi ofenta, ha ku yaalaan wax aan badnayn. Istimmaal burush iyo wixii la mid ah korkeeda. Midida iyo wixii la midiba waa qalab aad u wanaagsan si loo nadiifiyo oo loogaadho meelha ay cuntadu gashay. Tusmadani waxay u baahnaan doontaa waxa loo yaqaanno "Elbow Grease." Isku day in aad nadiifiso ofentaad si joogto ah.

Window and Mirror Cleaner

- Khalka
- Biyo

¼ koob oo khal ah ku shub dhalo ama guraarad la buufin karo leh. Ka buuxi biyo. Ku buufi korkeed. Ku masax ama ku xoq burush ama wixii la mida, ama xaashiyo ama waraaqo. Dhinaca daaqadaha ama dariishadaha banaanka, isticmaal burush kadibna ku maydh ama ku dhaq isagoo leh biyo diiran oo ay ku jiraan dhawr dhibcood oo saabuunta kaasteello (Liquid castile soap). Kadibna si fiican uga maydh ama uga dhaq

Saabuunta Budada ah

- Beekin soda
- Saabuunta loo yaqaanno kaastiilo (castile)

Istimmaal beekinsoodaha halkiiaad ka isticmaali lahayd saabuunt budada ah. Qoy meesha. Ku dul shub beekin soodaha kadibna ku masax ama ku duug maro ama wax qoyan. Kadibna si fiican u maydh.

Dhinaca musqulaha ama suuliga, ku duldaadi beekin soodaha weel, ku dar dhibco yaryar oo saabuunta loo yaqaano kaastiilo (castile) kadibna ka dhaq ama ka maydh.

